QODOBADA RASMIGA AH EE KULANKA FOGAAN ARAGA AH EE GUDDIGA DUGSIYADA BOSTON

Diseembar 14, 2022

Guddiga Dugsiyada Boston waxay kulan fogaan arag ah ku yeesheen aaladda Zoom Diseembar 14, 2022 saacadu marki ay ahayd 5 p.m. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan mid ka mid ah shayada hoos ku taxan, booqo www.bostonpublicschools.org/schoolcommittee, iimayl ugu dir feedback@bostonpublicschools.org ama ka wac Xafiiska Guddida Dugsiyada Boston (617) 635-9014.

KA SOO QEYBGALAYAASHA

Xubnaha Guddiga Dugsiga ee soo xaadiray: Guddoomiye Jeri Robinson; Guddoomiye ku xigeenka Michael D. O'Neill; Stephen Alkins; Brandon Cardet-Hernandez; Lorena Lopera; iyo Rafaela Polanco Garcia.

Xubnaha Guddiga Dugsiga ee Maqanaa: Quoc Tran; iyo wakiilka ardayda Diego Mehta.

DUKUMIINTIYADA LASOO BANDHIGAY

Ajandaha

Daqiiqadaha Kulanka: Diseembar 7, 2022

Ogaysiiska ku socda Guddiga Dugsiyada Ujeedo: Gorgortanka Maamulka Guild

Guild Qoraalka Heshiiska, Dhaqan gal ah Sibteembar 1, 2020 - Agoosto 31, 2022

Guild Qoraalka Heshiiska, Dhaqan gal ah Sibteembar 1, 2022 - Agoosto 31, 2024

Bandhigga PowerPoint ee Soo Jeedimaha Dib u Magacaabidda Dugsiyada iyo Goobaha

Tixraaca xusuus qorka: Wax Kabadalka Xeer Hoosaadyada Guddiga Dugsiga: Taariikhda Shirka Ururada 2023

Xusuus-qorka Warbixinta Maaliyadda

Warbixinta Maaliyadeed ee Bayaanka Saamaynta Sinnaanta

Bandhigga Warbixinta Maaliyadda, FY22-FY24

FY23 Warbixinta Miisaaniyadda Oktoobar Lacagaha Guud

FY23 Soo Koobidda Warbixinta Miisaaniyadda Oktoobar

Kulanka Fogaan Araga ah ee Guddiga Dugsiyada Boston
Zoom

Diseembar 14, 2022

FY23 Warbixinta Miisaaniyadda Oktoobar Deeqaha Aanan Ahayn ESSER

FURITAANKA KULANKA

Gudoomiye Jeri Robinson ayaa shirka furay oo hormuud u noqday ballan qaadka. Marwo Sullivan ayaa dadka yeerisay. Mudane Tran iyo Mudane Mehta ayaa maqnaa. Mudane Cardet-Hernandez iyo Mudane O'Neilll ayaa ka maqnaa isxaadiriska laakiin waxa ay kusoo biireen fadhiga fulinta oo socda. Dhammaan xubnaha kale ayaa joogay.

Marwo Robinson ayaa ku dhawaaqday in Guddigu isla markiiba hakin doono kalfadhiga fulinta ujeedadu tahay ka wadahadalka istiraatiijiyadda la xiriirta gorgortanka wadajirka ah ee lala yeelanayo Maamulka Guild, SEIU Local 888 iyo United Steelworkers oo wakiil ka ah Local 2936 (Ilaaliyaasha Baska). In wadahadalkan lagu qabto shir furan waxay saameyn xun ku yeelan kartaa mowqifka gorgortanka ee Guddiga. Waxay sheegtay in Guddigu uu ku soo laaban doono kalfadhiga dadweyne 6 p.m.

HAKINTA FADHIGA FULINTA

La ansixiyay - Iyada oo la yeerinayo, Guddiga ayaa si aqlabiyad ah ku ansixiyay mooshin lagu hakinayo kalfadhiga fulinta ujeedadu tahay ka wadahadalka istiraatiijiyadda la xiriirta gorgortanka wadajirka ah ee lala yeelanayo Maamulka Guild, SEIU Local 888 iyo United Steelworkers oo wakiil ka ah Local 2936 (Ilaaliyaasha Baska).

KU SOO NOQOSHADA KALFADHIGA DADWEYNE IYO FURITAANKA

Guddoomiye Robinson ayaa dib isugu yeeertay kulan kalfadhi dadweyne qiyaastii 6:07 p.m. Marwo Robinson ayaa ku dhawaaqday in Guddigu hadda ka soo noqday kalfadhiga fulinta ujeedadu tahay ka wadahadalka istiraatiijiyadda la xiriirta gorgortanka wadajirka ah ee lala yeelanayo Maamulka Guild, SEIU Local 888 iyo United Steelworkers oo wakiil ka ah Local 2936 (Ilaaliyaasha Baska).

Marwo Robinson ayaa sheegtay in kulanka caawa si toos ah looga daawanayay Zoom. Waxaa dib looga sii dayn doonaa telefeeshinka Magaalada Boston. Waxaa lasoo dhigi doonaa bostonpublicschools.org/schoolcommittee iyo YouTube. Waxay ku dhawaaqday in adeegyo tarjumaada isdaba jooogga ah loogu heli karo luuqada Isbaanishka, Haitian Creole, Cabo Verdean, Vietnamese, Cantonese, Mandarin iyo Luuqadda Dhagoolaha Mareykanka (ASL) waxa ayna bixisay tilmaamooyin kusaabsan sida loo helo tarjumaada isdaba jooogga ah iyadoo la beddelayo kanaalka Zoom. Dukumiintiyada laturjumay ee shirka ayaa lagu daabacay www.bostonpublicschools.org/schoolcommittee inta uusan shirka bilaaban kahor.

ANSIXINTA QODOBADA KULANKA

La ansixiyay – Iyada oo la yeerinayo, Guddiga ayaa si aqlabiyad ah ku ansixiyay qodobada kulanki Guddiga Dugsiga ee Diseembar 7, 2022.

WARBIXINTA KORMEERAHA GUUD

Kulanka Fogaan Araga ah ee Guddiga Dugsiyada Boston
Zoom

Diseembar 14, 2022

Sida loogu diyaariyey gudbinta.

Waad Mahadsantahay Marwo Gudoomiye. Fiid wanaagsan qof kasta. Inta aanan bilaabin kahor, waxaan rabaa inaan qiro in maanta ay tahay sannad guuradii tobanaad ee Sandy Hook. Toban sano kahor, waxaan dhamaanteen daawanay nolosha 26 caruur ah oo aan waxba galabsan iyo shaqaale ku dhintay rasaaseyn qori oo arxan darro ah. Marna ma hilmaami doonno sawiradaas iyo wajiyadaas iyo dareenka aanan go'aynin ee ay nagu yeesheen ka barayaal ahaan iyo bulshada dugsigeena. Fadlan igula soo biir qadar aamusnaan ah.

[QADAR AAMUSNAAN AH]

Mid kamid ah waxyaabaha aan mudnaanta siinayo ayaa ah xaqiijinta badbaadada; abuurista dhaqan dugsi oo badbaada u ah shaqaalaheena, ardaydeena iyo qoysaskeena. Waxaan sii wadeynaa inaan qiimeyno howlgalladeena, borotokoollada xarunta, iyo habraacyada. Waxaan fahansanahay in shaqadani ay qaadanayso wadashaqeyn dhammaanteena ah marka waxaan xiriir joogto ah la sameyneynaa waaxaha kale ee magaalada sida aan si firfircoon uga shaqeyn karno yareynta shilalka kahor inta aysan dhicin. Kooxdeydu waxa ay toddobaadki hore joogtay Dhageysiga Rabshada Rasaaseynta Qoriga ee lagu qabanayey Dugsiga Dhexe ee Lilla Frederick Pilot oo uu shir guddoomiyey Xildhibaanka Golaha Magaalada Brian Worrell. Shirki Golaha Magaalada waxa uu iftiimiyey baahida aan u qabno inaan sii wadno bixinta goobo taageero iyo bogsiin ah oo loogu talagalay dhalinyaradeena- waan sii wadi doonnaa inaan tan sameyno marka aan galno xilli miisaaniyadeed oo aan eegno inaan kordhinno tirada shaqaalaha bulshada.

Xagaaga soo socda, waxaan sii wadi doonnaa inaan taageerno ardaydeena iyo qoysaskeena anaga oo yeelaneyna shaqaalaheena bulshada ee goobaha dugsiga ee xagaaga oo aan yeelano shaqaale bulsheed oo dheeri ah oo hogaamiya jawaabta laga bixinayo xasradaha iyadoo lala kaashanayo hay'adaha magaalada. Waxaan sidoo kale ka shaqeyneynaa ballaarinta barnaamijyada latalinta iyo fursadaha hogaaminta asaaga inta lagu jiro bilaha xagaaga. Intaa waxaa dheer, waxaan la shaqeyn doonnaa xarumaha dhalinyarada ee maxalliga ah si aan goobo nabdoon u siino dhalinyaradeena halkaas oo ay ku dareemaan in la soo dhaweynayo.

Hogaamiye dugsi iyo aasaase ka ahaan, waan ogahay muhiimadda ay leedahay dhisidda kalsooni iyo cilaaqaad dhab ah oo lala yeesho ardaydeena iyo qoysaskeena, waxaana iga go'an inaan la shaqeeyo qof kasta si aan u xaqiijiyo in tani ay dhacdo. Marki aan suuradeeyo himilada kaqeyb gelinta qoyska iyo bulshada, waxaan doonayaa inaan ballaariyo shaqadeena annaga oo u mareyna Khadka Caawinta ee BPS iyo sidoo kale koritaanka Kooxda Kaqeyb Gelinta Bulshada. Waxaan aaminsanahay in ku lug lahaanshaha qeybaha muhiimka ah ee uga qeybgalka dadaalkeena oo qaab adag ah ay wadada u xaari doonto khadad wadaxariir oo dheeraad ah, gaar ahaan sida ay ula xariirto kulamada bulshada ee suuradeynta himilada iskudhafka, marin u helka kheyraadka ay bixiyaan Adeegyada Soo Dhaweynta, iyo helitaanka latalin joogta ah iyo ra'yi celin bulshada ka socota oo ku saabsan hannaanka Xulashada Dugsiga.

Inta aanu mustaqbalka kasii fakareyno, waxaan ku faraxsanahay qaar ka mid ah shaqadii aan ka bilownay meelaha kale, sidoo kale:

- Waxaan goor horeba bilownay qorsheynta Xagaaga ‘23. Waxaan ku dhiseynaa wixi aan kasoo baranay sanadki lasoo dhaafay: anaga oo ballaarineyna barnaamijyada shuraakada halkaas oo aan baahi weyn ka qabnay, furayno diiwaangelin xitaa kahor sidi sanadkii hore oo yoolku yahay inuu furnaado bartamaha Maarso, halkii uu ka ahaan lahaa Abriil,

iyo kor u qaadista aaladaheena diiwaangelinta si fudud si loogu heli karo dhammaan luuqadaha.

Annaga oo sii galeyna sanadka cusub, Guddiga Dugsiga waxaa lagu soo bandhigi doonaa dhowr warbixinood oo muhiim ah iyo talooyin ka socda Golaha Dugsiyada Magaalo Weynta oo ku saabsan badbaadada iyo gaadiidka gacan ka geysan doona in lagu ogeysiiyo shaqada Degmadeena. Ka xasuusin ahaan, warbixinadani waxa ay qeyb ka yihiin Qorshaha Horumarinta Nidaamka. Degmadu waxa ay abuuri doontaa qorshayaal fulineed oo looga jawaabayo talooyinkaan. Dugsiyadeenu waa inay deegaan waxbarasho, oo badbaado ah u noqdaan ardaydeena.

Waxaan sidoo kale jeclaan lahaa inaan xoogaa yar ka hadlo arrin la xiriirta warqad aan ka helnay Guddiga Maaliyadda Magaalada Boston. Waxaan qaadnaa ka go'naanshaheena ah in arday kasta uu si nabad ah ku tago oogana soo laabto dugsiga oo waqtigii loogu talagalay oo dhab ah oo aana sii wadno shaqada si aan u hagaajino nidaamkeena gaadiidka. Waxaan dib u eegis ku sameeyey waraaqda waxaana walaacyada lagu muujiyey kala hadlay kooxda.

Qandaraaska gaadiidka ee hadda jira waxa uu ku egyahay Juun 30, 2023. BPS iyo Magaaladu waxa ay si dadaal leh ugu shaqeynayeen muddo ka badan hal sano hannaan sannado badan ah si ay u diyaariyaan casuumaad loogu talagalay tartamada loo galayo qandaraasyada xiga ee gaadiidka laga bilaabo Luulyo 1, 2023. Casuumaada loogu talagalay tartamada loo galayo waxaa lagala kaashaday khubarada qeybta guud iyo guddi latalin isku dhafan oo BPS iyo Magaalada ah si loo xaqiijiyo in iibiyaha xiga si wanaagsan loogu meeleeyey inuu buuxiyo baahiyaha gaadiidka ee ardayda Boston. Sidaasi darteed, casuumaada loogu talagalay tartamada loo galayo ayaa si weyn loo horumariyey marka loo eego qandaraaska hadda jira. Si looga tarjuma baaxadda iyo cabbirka hadda jira ee hawlgalka gaadiidka, loo waafajiyo dhiirrigelinta waxqabadka si loo wado natiijooyinka hawlgalka ee la wanaajiyey, loona buuxiyo yoolalka istiraatiijiyadeed ee muddada-dheer ee degmada iyo baahiyaha gaadiidka.

Waxaan ku kalsoonahay in hannaanka tartan u galidda qandaraaska uu ahaa mid tartan ah iyo in soo bandhigga ka socday Transdev uu buuxinayo dhammaan shuruudaha u tartamidda qandaraaska. Waxaan ku sifowbeynaa heerarka sare ee xulashada, waxaana ku guda jirnaa diyaarinta jawaab rasmi ah oo aanu ka bixino waraaqda Guddiga Maaliyadda iyo in aan shir ka yeelano.

Marki aan ka hadalno badbaadada, ma ahan kaliya dhacdooyinka laakiin sidoo kale waa xaqiijinta in ardaydeena iyo shaqaalaheena ay yihiin kuwa caafimaad qaba. Sidi la filayey, waxaan aragnay koror ku yimid kiisaska la soo sheegay ee COVID-19 iyo cudurada kale ee neefmareenka sida Hergabka iyo RSV, kadib fasixi Mahadcelinta. Waxaan sii wadeynaa inaan tirada kiisaska aan leenahay ku maareyno borotokoolladeena hadda jira. Marka la eego inaan aragnay koror ku yimid kiisaska kajira halkan Boston, gaar ahaan koror weyn oo ku yimid biyaha wasakhda ah, iyo tirooyinka oo kor u sii kacaya dalka oo dhan, waxaan si dhow ugula shaqeyneynaa Guddiga Caafimaadka Dadweynaha ee Boston (BPHC) inaan tixgelino dhowr tillaabo dheeraad ah oo yareyn kara kadib xilliga qaboobaha.

Wadahadalladaan ayaa u badan inay horseedi doonaan isbeddelo ku yimaada borotokoolladeena hadda jira, laakiin ma lihin go'aanno kama dambeys ah oo ku saabsan waxa isbeddeladaasi ay noqon doonaan. Waxaan shirar badan berri iyo Jimcaha la leenahay BPHC waxaana fileynaa in go'aanno la gaaro maalmaha soo socda. Waxaan wixi isbeddelo ah oo ku yimaada borotokoolladeena hadda jira gaarsiin doonaa shaqaalaha, qoysaska iyo ardayda horraanta toddobaadka soo socda haddii loo baahdo. Waxaanu sii wadeynaa inaan baaritaanada degdegga ah oo bilaash ah siino arday kasta iyo xubin kasta oo ka tirsan shaqaalaha toddobaad kasta oo aan yeelano baaritaanka kuwa calaamadaha leh oo dugsiga dhexdiisa ah, waxaan leenahay borotokoolladeena nadiifinta oo noo diyaarsan waxaana sii wadeynaa inaan carrabka ku adkeyno muhiimadda ay leedahay gacmo dhaqashada iyo anshaxa neefsashada. Dugsi kasta waxa uu

haystaa afxirrada iyo agabka PPE oo ku filan muddo 3 bilood ah waxaana haysanaa afxirro badan oo meel dhexe noogu keydsan haddii dugsiyadu wax badan u baahdaan. Waxaan sidoo kale qiimeyneynaa xogta waxaana ka fakareynaa la qabsiga borotokoolladeena maxaa yeelay in badan oo idin kamid ah ayaa laga yaabaa inaad xasuusataan bishii Janaayo ee la soo dhaafay marki ay culeysyo waaweyn naga haysteen shaqaalaha kadib fasixi qaboobaha oo ay sabab u ahayd kororka weyn ee ku yimid kiisaska COVID-19.

Waxaan hadda u diyaargaroobeynaa xoogaa caqabado shaqaale oo suuragal ah annaga oo kordhinayna keydkeena badalka ah ee waxbarista, annaga oo siineyna $250 oo dheeraad ah kuwa badalka ah 10-kii maalmood oo ay shaqeeyaanba, annaga oo ka shaqeyneyna qorshe loogu talagalay keenista suuragalka ah ee xafiiska dhexe haddii loo baahdo iyo qabashada isla 3-dii kulan maalintiiba ee joogtada ahaa ee aan yeelan jirnay sanadkii hore oo ay koox hawleed isku duuban kormeereyso xaaladda caafimaadka iyo shaqaalaha.

Dhamaanteen waxaan leenahay door aad u muhiim ah inaan ka ciyaarno marki aan ka soo laabanno fasaxa:

- Isticmaalka agabka baaritaanka aan bixino kahor inta aadan soo laaban.
- Haddii aad xanuunsan tahay, guriga iska joog.
- Dhaq gacmahaaga oo adeegso anshaxa neefsashada ee wanaagsan.
- Si joogto ah u tirtir meelaha aadka loo taabto.

Waxaan rabaa inaan uga mahadceliyo kooxdeena adeegyada caafimaadka ee BPS, kalkaaliyaasheena dugsiga iyo Guddiga Caafimaadka Dadweynaha ee Boston wada-shaqeyntooda iyo iskaashigooda joogtada ah. Sanadahaan dhawrka ah ee lasoo dhaafay waxa ay runtii ahaayeen kuwa caqabad ah, laakiin dareenka joogtada ah ee “wadajir ayaan ugu jirnaa arrintan” ayaa noo oggolaaday inaan la soconno, qorsheyno oo aan hirgelino istiraatiijiyadaha yareynta saxda ah ee waqti gaar ah ugu baaqaya in la xaqiijiyo caafimaadka iyo badbaadada ardaydeena iyo shaqaalaheena.

Haddii ay jiraan wax joogta ah oo ku saabsan masiibadaas caabuqa, waa in arrimuhu si joogto ah isu beddeli doonaan. Waxaan hadda ku jirnaa waqti ka duwan wixi aan soo aragnay bilowgi sanad dugsiyeedka marka waa inaanu dib u qiimeyn ku sameynaa borotokoolladeena oo aanu ku sameyno isbeddellada ku habboon iyada oo lagu saleynayo xogta. Sidi aan horay u soo sheegay, ma jiro go'aan kama dambeys ah oo kusaabsan sameynta wax isbeddel ah oo la gaaray, waxaan mar labaad la kulmi doonnaa Guddiga Caafimaadka Dadweynaha ee Boston berri iyo Jimcaha waxaana wixii isbeddel ah ee lagu sameeyo borotokoolka soo sheegi doonnaa horraanta toddobaadka soo socda. Dhammaan go'aannada aan gaarno waxa ay ku saleysnaan doonaan xogteena iyo talooyinka ay soo jeediyaan xirfadlayaasheena caafimaadka.

Aag kale oo muhiim ah oo diiradda lagu saarayo hiigsigeyga ayaa ah dardargelinta waxqabadka tacliinta iyo xoojinta helitaanka barashada shucuurta-bulshanimada. Waxaan fursad u helay inaan la hadlo ardayda dhigata fasalka 7aad iyo 8aad ee Umana iyada oo qeyb ka ah Shuraakada Boston ee Education Big Cheese Initiative (Hindisaha Waxbarashada ee Hoggaamiyeyaasha). Hindisaha Khudbeeyaha Hogaamiyaha Martida ah waxa uu ku lug leeyahay hoggaamiyeyaasha muhiimka ah inay la wadaagaan oo ay ardayda kala duwan u soo bandhigaan shaqooyin kala duwan. Waa mid muhiim ah in ardaydeena loo soo bandhigo aragtiyo kala duwan iyo dariiqooyinka xirfadda inta ay sii korayaan, wax ku baranayaan oo ay ku baraarayaan degmadeena.

Tusaale kale oo middan ah waa shaqada aan ka wadno Green New Deal (Heshiiska Cagaaran ee Cusub). Shaqadani waxa ay ku saabsan tahay bixinta dammaanad tayo leh iyo bixinta goobo loo dhan yahay, waara oo loogu talagalay ardaydeena iyo qoysaskeena. Waxaan qiraynaa muhiimadda ay leedahay in lala wadaago bulshada iyo qoysaska ku xeeran qorshaynta iyo aragtida sida aan u gaarsiino shaqadan. Waxaan

wali gaarnay guul kale oo shaqadan ah iyada oo loo marayo xafladda iyo saxiixa soo gabagabeynta ee lagui qabtay Dugsiga Sare ee Josiah Quincy. Waxaan kala qeyb ahaa Duqa Wu, Hogaamiyaasha Dugsiga JQUS Richard Chang iyo Stephen Cirasuolo, Kerrie Griffin, Jim MacDonald iyo Guddiga Dugsiga iyo waalidka JQUS Rafa Polacia Garcia si loogu dabaaldego guushaan. Kuuma sheegi karo sida ay ugu faani jireen ardayda iyo sida ay u dhararayaan qorsheynta munaasabadaha iyo dabaaldegidda marka mashruucu dhammaado. Waxaan fahansanahay in shaqadani ay dhibaato muddo gaaban ah ukeeneysoo qoysaskeena laakiin dhismaha cusub waxa uu saameyn waarta uga tagi doonaa jiilalka soo socda. Waxaan qiraynaa muhiimadda ay leedahay in lala wadaago bulshada iyo qoysaska ku xeeran qorshaynta iyo aragtida booska ilaa iyo maanta

Intaa waxaa dheer, waxa ay ahayd wax wanaagsan in nadiifiyayaasha lagala shaqeeyo Ciidda Sanadlaha ah ee Boombale Soo Ururinta ee Bolling. Waad ku mahadsan tihiin dhammaan kuwa hadiyadaha u keenay inay farxadda ciidaha gaarsiiyaan carruurta baahan.

Sabtidan lasoo dhaafay, qoysaska waxa ay ka soo qeybgaleen Bandhiggeena Dugsiyada ee Akadeemiyada Boston Latin, halkaas oo ay ku awoodeen inay dhammaan xulashooyinka is-diiwaangelinta ay hoos geeyaan hal meel. Waxaan u mahadcelineynaa dhammaan hoggaamiyeyaasha dugsiga iyo shaqaalaha gacanta ku hayey inay ka jawaabaan su'aalaha ku saabsan dugsiyadooda iyo hannaanka is-diiwaangelinta. Is-diiwaangelintu waxa ay bilaabataa bisha Janaayo 4teeda waxa ayna sii socotaa ilaa Febraayo 3 ee fasallada K0, K1, K2 (oo hadda cusub), 6, 7* iyo 9. Dhammaan fasallada kale ayaa is-diiwaangelinaya laga bilaabo bisha Febraayo, waxaana isugu soo noqon doonaa sanadka cusub si aan uga hadalno wax badan oo ku saabsan dhammaan jadwalladaan.

Waxaan sidoo doonayaa inaan ammaan huwiyo shaqaalaha Akadeemiyada L'Ouverture ee Dugsiga Hoose ee Mattahunt iyo ardaydi dhawaan lagu soo bandhigay *The Boston Globe*. Akademigaan waxa uu manhajka ku bixiyaa labada luuqadood ee Af-Ingiriis iyo Haitian Creole waxa uuna tusaale u yahay sida ay nooga go'antahay ballaarinta barnaamijyada ardayda ku hadla luuqadaha badan.

Waxaan rabay inaan bixiyo warbixinadi ugu dambeeyey ee kusaabsan horumarinta cajiibka ah ee ka socota Dugsiga Sare ee Farsamada Gacanta ee Madison Park. Ugu horreyn, waxaan rabaa inaan ammaan huwiyo xubnaha bulshada Madison – ardayda, qoysaska, barayaasha iyo hogaamiyaasha dugsiga–waxaan u aragnaa adinka iyo dhammaan shaqada adag ee aad u qabaneysaan dugsigiina si aad u waddaan hormarinta.

Waxaan rabay inaan iftiimiyo dhawr ilo oo caddeyn ah oo kalsooni igu siinaya in arrimaha ay soo hagaagayaan:

- Madison Park ayaa helay deeq 1 milyan oo doolar ah oo loogu talagalay barnaamijkiisa nijaarnimada
- Ardayda kaqeybgaleysa Co-OP waxa ay saddex jibaarmeen labadi sano ee lasoo dhaafay
- Kaqeybgalka ardayda iyo ka qalin jabinta Kulleejka Hore ee RoxMapp ayaa si weyn sare ugu kacay
- Madison Park waxa uu lahaa tirada ugu badan ee ardayda fasalka 9aad iyo waalidiinta ee kasoo qeyb galay Isbarashada Ardaydeena Cusub siddeedii sano ee la soo dhaafay.
- Xogta Socodka Waxbarashada waxa ay soo jeedineysaa kororka ku yimid waxbarashada adag.
- Wadahadalka kusaabsan Madison Park oo cusub ama dayactir lagu sameeyo ayaa horay ugu sii socda heerar waaweyn oo hawlgal ah

Waxaan sidoo kale rabay inaan Guddiga Dugsiga uqaabeeyo ajendaha soo socda ee la xariira siyaasadda arday qorista dugsiga ee bisha soo socota. Bishi Juun 2022, Kooxda Wax Kaqabashada ee Madison Park TVHS ayaa talooyin dhowr ah usoo jeediyey kormeerihi hore Dr. Brenda Casselius. Mid kamid ah talooyinkaas ayaa kusaabsanaa siyaasadda arday qorista, oo ay sidoo kale ubaahan tahay DESE. Bishi Agosto 2022, Dr. Brown ayaa sameeyay Guddi Arday Qorista si waafaqsan taladan. Bishi Oktoobar 2022, shirar wada jir ah ayaa lala yeeshay

shaqaalaha Xafiiska Dhexe, maamulka Madison Park, iyo Kooxda Wax Kaqabashada ee Madison Park. Iyada oo ay daba socoto kalfadhiyadaan, Guddiga Arday Qorista ayaa kulmay si ay u soo saaraan istiraatiijiyad. Hannaankani waxa uu ahaa mid loo dhan yahay, wada shaqeyn leh waxa uuna kaqeybeliyey qeybo kala duwan oo badan.

Waxaad caawa maqli doontaa soo bandhigid ku saabsan miisaaniyadda. Miisaaniyadda sanadkan, iyo kan xigaba waxa ay leeyihiin mowduuc ku saabsan nagaanshaha, istiraatiijiyadda, iyo natiijooyinka ardayda annaga oo usii jiheysaneyno dhammaadka ESSER oo maalgashi qoto dheer ahna ku bilaabeyna meelaha ay ka midka yihiin kamid noqoshada, waxbarasho laba luqadood ah, akhris-qoraalka loo siman yahay, taageerooyinka shucuurta bulshada iyo cadaalad soo celinta, kulleej hore iyo dariiqooyinka shaqada iyo ka qeybgalka qoyska iyo bulshada. Miisaaniyadda sanadkan iyo kan xigaba waa in lala sameeyaa hogaamiyaasha dugsiga iyo bulshooyinka dugsiga oo taageero aad u badan ka helaya xafiiska miisaaniyadda, kormeerayaasha guud ee gobolka, iyo xiriiriyaasha shabakadda. Aag kasta oo diiradda lagu saarayo waxa uu nooga baahnaan doonaa inaan dib u qaabeyno miisaaniyadda iyada oo loo marayo jihada sinnaanta iyo kamid noqoshada. Shalay waxaan si wadajir ah isugu keenay hoggaamiyaasha dugsiga waxaana awooday inaan kala hadlo wax kusaabsan dib u soo nooleynta shaqadeenna degmada oo dhan iyo dib u xaqiijinta sida ay nooga go'antahay kamid noqoshada iyo sinnaanta.

Waxaan rabaa inaan ooga mahad celiyo Sarkaalkeena Madaxa Maaliyadda iyo kooxda miisaaniyadda oo dhan dhammaan shaqadoodi aanan hagrashada lahayn ee bishii la soo dhaafay annaga oo usii diyaar garoobayno xilli miisaaniyadeedka oo aana xaqiijineyno in kooxaheenna, hoggaamiyaasha dugsiga iyo bulshada dugsiga ay haystaan waxa ay ugu baahan yihiin inay go'aamada ugu fiican u sameeyaan ardaydeena.

Annaga oo soo xireyno kulanki ugu dambeeyey ee Guddiga Dugsiga ee sanadkan, waxaan rabaa inaan ugu hambalyeeyo labada gudoomiye Robinson iyo xubin ka tirsan Guddiga Dugsiga ee Tran dib u magacaabiddooda Guddiga Dugsiga. Guddoomiye Robinson iyo Mr. Tran, ardaydeena, qoysaskeena iyo bulshada ayaa wanaagsan sababta oo ah u doodista iyo ula qasadka aad labadiinaba miiska keentaan. Waxaan rabaa inaan mar kale ooga mahad celiyo mid kasta oo idin kamid ah sida aad u taageerteen shaqadeena. Waxaan ku faraxsanahay sida ay idin kaga go'an tahay iyo sii wadida taageerada maamulka urukan. Runtii si aad ah ayaan ugu mahadnaqayaa ku luglahaanshihiina joogtada ah iyo rabitaankiina aad ku yeelaneysaan wada hadallo ixtiraam leh oo ku saabsan shaqada. Waxaan aad ugu faraxsanahay waxa soo socda waxaana ku rajo weynahay safarka soo socda.

Xubnaha waxa ay Ms. Robinson iyo Mr. Tran uga hanbalyeynayaan dib ugu magacaabidooda guddiga.

Dr. Alkins ayaa wax ka weydiiyey borotokoollada caafimaadka iyo Badbaadada ee COVID iyo gabaabsi suuragal ah oo kuyimaada macalimiinta kadib fasaxa. Kormeeraha Guud ayaa sheegay in kormeerayaasha guud ee dugsiga ay had iyo jeer la socdaan daboolista shaqaalaha oo ayna eegayaan xogti sanadki lasoo dhaafay inay u noqoto bar tixraac. Lataliyaha Sare Megan Costello iyo Agaasimaha Sare ee Adeegyada Caafimaadka Djenny Lobo Lopes ayaa bixiyey warbixinti ugu dambeysay ee ku saabsan la socodka iskaashiga iyo qorsheynta degmada ee lala leeyahay Guddiga Caafimaadka Dadweynaha ee Boston. Cudurro dillaaca waxaa lagu qeexaa saddex kiis ama kabadan oo kadhaca fasal dhexdiisa in ka badan muddo toddobo maalmood ah.

Kulanka Fogaan Araga ah ee Guddiga Dugsiyada Boston
Zoom

Diseembar 14, 2022

Marwo Lopera ayaa weydiisay sida soo jeedinta Trandev ay u buuxineyso baahiyaha BPS. Kormeeraha guud ayaa sharraxay in soo jeedinta ay ku dhisan tahay la xisaabtanka cabbirrada ka maqan aagagga muhiimka ah. Ku-xigeenka Agaasimaha Gaadiidka Dan Rosengard ayaa sheegay in shaqaalaha degmada ay si wada jir ah BID wax ugala dhiseen khubarrada qeybta guud muddo sanad ah si ay u qaabeeyaan shuruudaha ugu yar, iyo uqalmitaanada si loogu adeego hawlgallada adag ee Boston.

Marwo Polanco Garcia ayaa sheegtay inay maqashay walaac ka imanaya qoysaska oo ku saabsan hawo soogalista ku habboon. Ku Xigeenka Kormeeraha Guud ee Hawlgalka Sam Depina iyo Sarkaalka Madaxa Hawlgallada Indira Alvarz ayaa sharraxay in sifeeyayaasha hawada la badalo laba jeer sanadkiiba halka sifeeyayaasha MERV la badalo sanadkiiba mar. Waxa ay isku raaceen inay dabagal dheeraad ah ku sameeyaan macluumaadka ku saabsan dugsiyada isticmaala sifeeyayaasha hawada ee MERV. Marwo Polanco Garcia ayaa wax ka weydiisay maqnaanshaha iyo xulashooyinka ardayda ay kusoo gudayaan shaqadi dhaaftay. Kormeeraha guud waxa uu sheegay in ardaydu ay marin u helaan waxbaridda khadka tooska ah ayna la shaqeyn karaan macallimiinta si ay u helaan taageero dheeri ah marki ay maqan yihiin. Madaxa Dugsiyada Drew Echelson ayaa sharraxaad ka bixiyey borotokoollada lagu soo gudayo shaqadi dhaaftay ardayda. Waxa uu sheegay inuu dabagal la sameyn doono kormeerayaasha guud ee dugsiyada oo kusaabsan walaacyada ay qabto Marwo Polanco Garcia ee kusaabsan gudida shaqada.

Mudane Cardet-Hernandez ayaa wax ka weydiiyey yoolalka degmada ee barnaamijka xagaaga. Kormeeraha Guud ayaa sheegtay inay rabto inay aragto boqolkiiba koror ku yimaada tirada barnaamijyada guud, iyo sidoo kale kordhinta helitaanka ardayda isticmaalaya kuraasta. Waxa ay sidoo kale rabtaa inay aragto horumarinno lagu sameeyo xagga isgaarsiinta iyo wacyigelinta, fududeynta hannaanka is-diiwaangelinta. Madaxa Ku-meelgaarka Sarkaalka Kheyraadka Shaqaalaha Rae Catchings ayaa sharraxday in BPS ay hadda leedahay ku dhawaad 200 oo boos oo macallinimada ah oo bannaan iyo waxyar wax kayar 400 oo macallin oo ku jira nidaamka ka dhaafista. Mudane Cardet-Hernandez ayaa codsaday burburinta macalimiinta aanan ruqsada haysan ee dhiga aaggaga muhiimka ah ee maadada. Marwo Catchings ayaa ku raacday in dabagal lagu sameeyo xogta.

Dr. Alkins ayaa codsaday warbixin kusaabsan Heshiiska Cagaaran ee Cusub. Mudane Depina ayaa sheegay dhaashboodhka xogta xarumaha in lagu hawl jiro.

Marwo Lopera ayaa wax ka weydiisay jadwalka hirgelinta talooyinka waxbarashada gaarka ah ee Golaha Dugsiyada ee Magaalo Weynta. Kormeeraha Guud ayaa sharraxay inay jiraan isa soo dhexgal u dhexeeya qaar ka mid ah talooyinka waxbarashada gaarka ah iyo Xafiiska Waxbarshada Luqadaha Badan iyo Dhaqamada Badan (OMME). Ku-xigeenka Sare ee Kormeeraha Guud ee Tacliinta Linda Chen ayaa sheegtay in kooxdu ay qorsheyn doonto inay Guddiga Dugsiga sanadka cusub ku wargeliyaan waxbarashada gaarka ah iyo OMME, oo ay kujirto warbixin kusaabsan shaqaaleysiinta Lataliyaha Sare ee Waxbarashada Gaarka ah.

Mudane Cardet-Hernandez ayaa wax ka waydiiyey maqnaanshaha daba dheeraaday. Kormeeraha guud waxa uu soo bandhigay inuu bixiyo warbixin sanadka cusub wuxuuna ka hadlay istiraatiijiyadaha dib-u-hawlgalgelinta. Waxa ay ku ammaantay Dugsiyada Sare ee Brighton iyo Charlestown bixinta fursado dabacsan oo loogu talagalay ardayda aanan dhabbaha haynin.

Mudane O'Neill waxa uu sheegay inuu rajeynayo inuu helo soojeedin ku saabsan hirgelinta talooyinka waxbarashada gaarka ah sanadka cusub, isagoo gudbinaya dareen degdeg ah. Wuxuu sheegay inuu sidoo kale rajeynayo inuu ka sii hadlo wadahadallada ku saabsan qandaraaska gaadiidka. Kormeeraha guud ayaa kahadlay baahida loo qabo in arrimaha nidaamyada wax looga qabto qaab laga fakaray, oo dhammeystiran. Mudane O'Neill ayaa uga mahad celiyey Marwo Robinson iyo Mudane Tran rabitaankooda ay ku adeegayaan.

Marwo Robinson ayaa ku dhiirrigelisay degmada inay la xiriirto qoysaska kahor diiwaangelinta si ay qoysaska uga caawiso qorshaha. Kormeeraha guud ayaa ku raacday.

Marwo Robinson ayaa kahadashay muhiimada ay leedahay in macalimiinta ugu wanaagsan la hor keeno ardayda. Kormeeraha guud ayaa ku raacday, iyada oo intaa ku dareysa in kooxdeeda ay mudnaanta siineyso shahaadeynta macallimiinta ee aaggaga muhiimka ah ee maadada.

La ansixiyey - Iyada oo la yeerinayo, Guddiga ayaa si aqlabiyad ah ku ansixiyay Warbixinta Kormeeraha Guud.

WARBIXIN

Heshiisyada Hordhaca ah ee Gorgortanka Wadajirka ah ee u dhexeeya Guddiga Dugsiyada Boston iyo Maamulka Guild, SEIU Local 888 iyo Codsiyada Qoondeynta Dheeraadka ah - Agaasimaha Xiriirada Shaqada Jeremiah Hasson ayaa soo bandhigay nuxurka heshiisyada hordhaca ah ee gorgortanka wadajirka ah ee u dhexeeya Guddiga Dugsiyada Boston iyo Maamulka Guild SEIU Local 888 laga bilaabo 2020-2022 iyo 2022-2024.

Nuxurka Qandaraaska 1: Muddada uu soconayo: Sibteembar 1, 2020 – Agoosto 31, 2022 (mushaarka kaliya ayaa ah kahor heshiiska)
Mushaarka:
● FY21: 2%
● FY22: 2.5%, oo lagu daray lacag hal mar ah oo hal mar ah oo ah $1,000

Nuxurka Qandaraaska 2L Muddada uu soconayo: Sibteembar 1, 2022 – Agoosto 31, 2024
Mushaarka:
● FY23: 2.5%
● FY24: 2.5%

Mudane Hasson ayaa sidoo kale soo bandhigay codsiyada qoondeynta isticmaalka kabka ah ee FY 23 ee soo socda si loo taageero heshiisyada gorgortanka wadajirka ah:

- Codsiga Qoondeynta Isticmaalka Kabka FY23 ee cadadka $703,939 si loogu taageero labo Heshiis oo Is Afgarad ah ee Ku Guuleysiga Heshiiska Gorgortanka Wadajirka ah ee Muddada Sibteembar 1, 2020 ilaa Ogoosto 31, 2024 oo u dhexeeya Ururka Maamulka, SEIU Local 888 iyo Guddiga Dugsiyada Boston
- Codsiga Qoondeynta Isticmaalka Kabka FY23 ee cadadka $1,283,486 si loogu taageero labo Heshiis oo Is Afgarad ah ee ku Guuleysiga Heshiiska Gorgortanka Wadajirka ah ee muddada Sibteembar 1, 2021 ilaa Ogoosto 31, 2024 oo u dhexeeya Ururka Maxaliga Lambar 1952, Riinjiyeeyaasha & Isbahaysiga Ganacsatada, Golaha Deegaanka Lambar 35 (Nadiifiyayaasha) iyo Guddiga Dugsiyada Boston
    -
- Codsiga Qoondeynta Isticmaalka Kabka FY23 ee cadadka $164,448 si loogu taageero labo Heshiis oo Is Afgarad ah ee Ku Guuleysiga Heshiiska Gorgortanka Wadajirka ah ee Muddada Sibteembar 1, 2020 ilaa Ogoosto 31, 2024 oo u dhexeeya Ururka Booliska Macaash Doonka Aheyn ee New England, Ururka Booliska Roondada Dugsiyada Boston ee Local 160 iyo Guddiga Dugsiyada Boston

Guddiga ayaa loo qorsheeyay in ay u codeeyaan heshiisyada Guild iyo codsiyada qoondeynta isticmaalka kabka goor dambe fiidnimadan.

FAALLADA DADWEYNAHA EE GUUD

Robert Jenkins, oo degan Mattapan oo u doode ah, ayaa ka marag kacay inuu door bidaayo soo jeedinta magac cusub u bixinta Dugsiga Sare ee Farsamada Gacanta ee Madison Park iyo Dugsiga Hoose ee Mattahunt/Xarunta Bulshada Mattahunt.

Ruby Reyes, daganaha Dorchester iyo Agaasimaha Fulinta Dallada Caddaaladda Waxbarashada Boston (BEJA), ayaa ka marag kacday badqabka dugsiga.

Edith Bazile, oo degan Hyde Park iyo u doode, ayaa ka marag kacday sinnaanta jinsiyadda ee kajirta BPS.

Becky Reindel, oo degan Cambridge iyo wakiilka Adeegyada Sharciga ee Boston oo Dhan, ayaa ka marag kacday badqabka ardayga.

Michael Heichman, oo degan Dorchester xubina ka ah BEJA, ayaa ka marag kacay sinnaanta jinsiyadda ee kajirta BPS.

Lauren Peter, oo degan Roslindale kana tirsan waalidka Dugsiga Hoose ee Sumner, ayaa ka marag kacday isku darka la soo jeediyay ee u dhexeeya Sumner iyo dugsiyada Hoose ee Philbrick.

Ariel Adelman, oo degan Brighton iyo u doode, ayaa ka marag kacday sinnaanta dugsiga ee carruurta naafada ah iyo qoysaska.

Dadkaan soo soda waxa ay ka marag kaceen borotokoollada badbaadada ee la xiriira Covid:

- Cheryl Buckman, oo degan South Boston, waalid katirsan BPS iyo xubin katirsan FamCoSA
- Betsy Yoshimura, oo degan East Boston resident waalidna ka ah Akadeemiyada Umana
- Suleika Soto, oo degan South End resident xubina ka ah BEJA, ayaa akhrisay bayaan ka soo baxay Senatka Kulliyadda Kalkaalisada

WAXYAABAHA WAXQABADKA

Mudane O'Neill waxa uu uga mahadceliyay bulshooyinka dugsiga inay ku lug lahaayeen geedi socod dib-u-magacaabid fikir leh, isagoo intaas ku daray inuu ku faanayo inuu u codeeyo doorka soo jeedinta dib-u-magacaabid. Marwo Lopera ayaa ayiday faallooyinkiisa, iyada oo bidhaamineysa in hannaanku ay gar wadeen ka ahaayeen bulshada dugsiga. Marwo Robinson ayaa rajo ka muujisay in taariikh nololeedyada laga qori doono qaar ka mid ah kuwa sharafta mudan.

La ansixiyey - Iyada oo la yeerinayo, Guddiga ayaa si aqlabiyad ah ku ansixiyay talo soojeedinti Kormeeraha Guud in dib loo magacaabo 27 meelood oo kuyaalo Akadeemiyada Farshaxanka Boston (BAA) iyada oo lagu sharfayo shakhsiyaadkii wax weyn ku taray BAA.

La ansixiyey - Iyada oo la yeerinayo, Guddiga ayaa si aqlabiyad ah ku ansixiyay talo soojeedinti Kormeeraha Guud in dib loo magacaabo laba qol oo kuyaala Dugsiga Sare ee Farsamada Gacanta ee Madison Park iyada oo lagu sharfaayo xubno hore oo katirsanaa shaqaalaha Charles McAfee iyo Jose Solis.

La ansixiyey - Iyada oo la yeerinayo, Guddiga ayaa si aqlabiyad ah ku ansixiyay talo soojeedinti Kormeeraha Guud in dib loo magacaabo hal qol oo kuyaala Xarunta Bulshada Mattahunt/Dugsiga Hoose ee Mattahunt iyada oo lagu sharfayo u dhaqdhaqaaqaha bulashada Annie Kinkead.

La ansixiyey - Iyada oo la yeerinayo, Guddiga ayaa si aqlabiyad ah ku ansixiyay talo soojeedinti Kormeeraha Guud in Barnaamijyada McKinley dib loogu magacaabo Melvin H. King South End Academy iyada oo lagu sharfayo Wakiilki hore ee Gobolka ee Suffolk 9-aad, ardaygi hore ee BPS iyo baraha, iyo u doodaha dhallinyarada.

La ansixiyey - Iyada oo la yeerinayo, Guddiga ayaa si aqlabiyad ah ku ansixiyay Heshiiska Qoraalka ee u dhexeeya Maamulka Guild, SEIU Local 888 iyo Guddiga Dugsiyada Boston, oo dhaqangal ah Sibteembar 1, 2020 - Agoosto 31, 2022.

La ansixiyey - Iyada oo la yeerinayo, Guddiga ayaa si aqlabiyad ah ku ansixiyay Heshiiska Qoraalka ee u dhexeeya Maamulka Guild, SEIU Local 888 iyo Guddiga Dugsiyada Boston, oo dhaqangal ah Sibteembar 1, 2022 - Agoosto 31, 2024.

La ansixiyey - Iyada oo la yeerinayo, Guddiga ayaa si aqlabiyad ah ku ansixiyay mooshin lagu joojinayo qodobka II, Faqrada 1 ee Xeer Hoosaadka Guddiga Dugsiyada Boston oo kaga baahanaya Guddiga inay "isugu yimaadaan kulankooda sanadlaha ah Isniinta ugu horreysa bisha Janaayo ee sanad kasta." Maaddaama Isniinta ugu horreysa ee bisha Janaayo 2023 ay ku aadeyso fasaxa dadweynaha ee Maalinta Sannadka Cusub La Xuso, Guddiga Dugsigu waxa uu halkan ugu codeynayaa inuu kulankiisa sanadlaha ah ee 2023 isugu yimaado bisha Janaayo 4, 2023.

WARBIXIN

Warbixinta Maaliyadda, FY22-FY24 - Sarkaalka Madaxa Dhaqaalaha Nate Kuder waxa uu soo bandhigay warbixin ku saabsan xaaladda Sannad Maaliyadeedka (FY) miisaaniyadda 2022 ee dhammaadka sanad miisaaniyadeedkaas, xaaladda miisaaniyadda hadda jirta ee FY23, iyo arrimaha iyo qorsheynta hore ee FY24. Mudane Kuder waxaa kula biiray lasoo bandhigayaasha David Bloom, Ku-xigeenka Madaxa Sarkaalka Maaliyadda, iyo Serena LaRocque, Agaasimaha La Xisaabtanka Maalgelinta Dugsiga.

Sannad Maaliyadeedka FY22, meelaha ka sarreeya kharashyadi markii hore la filayey waxaa ka mid ah: Shaqaalaha ku meel gaarka ah, Adeegyada Guryaha, iyo Gaadiidka. Meelaha aanu ku aqoonsanay kaydka shaqaynta oo aanu dib u kala hormarinay lacagaha la heli karo: Mushaaraadka Shaqaalaha, Caymiska Caafimaadka, iyo Adeegyada Qandaraasyada Lala Galay. In kasta oo ay isbeddeladaasi jiraan, BPS waxay ku dhammeysatay sanadka iyada oo kudhex jirta xeyndaabka miisaaniyadda oo ah sanadki 32aad oo isku xiga. Sanad Maaliyadeedka FY23, oo ah sanadka maaliyadeed ee hadda jira, kooxda maaliyaddu waxay soo bandhigeen warbixinadi ugu dambeeyey ee maalgashiga FY23 waxayna bixiyeen warbixintii ugu horreysay ee kharash garaynta loo saadaaliyay sanad maaliyadeedka. Mudane Kuder waxa uu muujiyay kalsooni ah in BPS ay sidoo kale ku dhex dhammeysan doonto sanad maaliyadeedkan xeyndaabka miisaaniyadda dhexdiisa. Qeybtan soo bandhigida ayaa sidoo kale lagu daray warbixin kusaabsan lacagaha Gargaarka Degdegga ah ee Dugsiyada Hoose iyo Sare (ESSER). Soo bandhigiddu waxaa lagu soo afmeeray bandhigga miisaaniyadda FY24, kaas oo Kormeeraha guud iyo kooxda maaliyaddu ay si buuxda u soo bandhigi doonaan Febraayo 1, 2023 oona bilaaban doona Juulaay 1, 2023. Marka laga yimaado wadaaga qaabka soo ifbixidda miisaaniyadda FY24, kooxdu waxay sidoo kale horay u eegis ku sameysay sida degmadu u qorsheyneyso sii jiritaanka sanadka ugu dambeeya ee ESSER.

Mudane Cardet-Hernandez waxa uu walaac ka muujiyey aragtida maaliyadeed ee FY25 marka lacagaha ESSER waqtigooda uu dhaco. Waxa uu ka digay isticmaalka degista jilicsan. Mudane Kuder waxa uu sharraxay fikradda tayada aasaaska wuxuuna hayaa maalgelin aan dhib lahayn. Kormeeraha guud waxa uu sheegay in hogaamiyaasha xafiiska dhexe ay kala shaqeynayaan hogaamiyaasha dugsiga si ay uga caawiyaan inay gaaraan go'aano istiraatiiji ah. Mudane Cardet-Hernandez ayaa xusay in taageero badan oo shucuurta-bulsheed ah ay maalgaliso ESSER ayna tahay inay u gudubto miisaaniyadda guud.

Dr. Alkins ayaa codsaday xog ku saabsan heerarka qabashada fasalka, kaas oo Mudane Kuder uu ogolaaday inuu bixiyo. Marwo LaRocque ayaa sheegtay in kooxda maaliyaddu ay tixgalineyso inay adeegsato Miiska Wadahadalka Sinaanta Dugsiga Ku Saleysan si qoysaska looga qeybgalsho miisaaniyadda.

Marwo Lopera ayaa wax ka weydiisay saadaasha isdiiwaangelinta iyo istiraatiijiyadda isdiiwaangelinta. Mudane Kuder ayaa sharraxay sida BPS ay ula shaqeyso Hay'adda Qorsheynta iyo Horumarinta Boston si ay u horumariso qaababka saadaalinta iyadoo lagu saleynayo dhowr arrimood. Waxa uu sheegay in BPS ay tixgelineyso la shuraakoobidda urur dibadeed si ay u bartaan isbeddellada tirakoobka muddada-dheer. Waxa uu sheegay in diiwaangelinta hadda jirta ay tahay saadaalinta ugu weyn ee diiwaangelinta mustaqbalka, iyadoo kooxuhu ku dhex socdaan nidaamka. Waxa uu sheegay in BPS ay daahfuri doonto wadahadallo xaafadda ku saleysan oo kusaabsan Heshiiska Cagaaran ee Cusub.

Mudane Cardet-Hernandez ayaa kahadlay qiimaha ay leedahay kaqeybgelinta qoysaska Pre-K iyada oo loo marayo kooxaha ciyaarta. Waxaa uu ka digay in sanadaha soo socda, degmadu ay dakhli cusub uga baahan doonto Magaalada ama ay ubaahan doonto inay iskudheelitir sameyso.

Marwo Lopera ayaa codsatay kala goynta xogta maalgashiga ESSER II iyo ESSER III ee dugsiga. Waxa ay ku dhiirrigelisay degmada inay aqoonsato oo ay la wadaagto dhaqamada ugu wanaagsan ee heerka dugsiga. Marwo LaRocque waxay sheegtay in guddiga la siin doono warbixinta miisaaniyadda billaha ah oo ay ku jiraan macluumaadka faahfaahsan ee ESSER.

Mudane O'Neill waxa uu walaac ka muujiyey in dugsiyada qaar aysan galin lacagaha ESSER. Mudane Bloom waxa uu sharraxay in aan lacag lagu soo celin gobolka sanadkii la soo dhaafay. Waxa uu intaas ku daray in BPS ay hayso dhabbaha in dhammaan lacagaha si ku habboon loogu tiro koobo ama si buuxda loogu kharash gareeyo waqtiga loo qabtay. Mudane O'Neill waxa uu wax ka weydiiyay saameynta isbeddelada diiwaangelinta iyadoo BPS ay ka weecaneyso dugsiyada dhexe isla markaana ay qaadato ugu horeyn qaabka K-6/7-12 iyo K-8/9-12. Mudane Kuder ayaa sheegay in qaabka uu saadaalin dheeraad ah u keenay qoysaska, isagoo xusaya in BPS ay aragtay kororka diiwaangelinta fasalka afaraad ee dugsiyada ku daray fasalka lixaad. Mudane O'Neill ayaa kahadlay muhiimada ay leedahay ku lug lahaanshaha qoysaska ee iskudarka dugsiga.

Marwo Robinson ayaa ka hadashay caqabadaha la xiriira taageerida dugsiyada iyada oo ay hoos u dhacayso diiwaangelinta iyo ballaarinta kamid noqoshada. Mudane Bloom ayaa ka hadlay muhiimada ay leedahay qaadashada go'aanno ula qasad ah. Marwo Robinson ayaa weydiisay haddii dhammaan dugsiyada sare ay bixiyaan Luqadaha Adduunka oo qayb ka ah MassCore. Soo bandhigayaasha waxa ay isku raaceen inay dabagalaan. Madaxa Taageerada Ardayda Jillian Kelton ayaa ka hadashay maalgashiga degmada ee ku saabsan dhaqamada caddaalad soo celinta.

FAALLADA DADWEYNAHA EE WARBIXINTA

Midna.

ARRIN CUSUB

Dr. Alkins ayaa soo jeediyay in Guddigu uu yeesho wadahadal ku saabsan walaacyada qaarkood ee la soo saaray inta lagu gudajiro faallada guud ee dadweynaha ee la xiriira soo jeedinta si loogu daro jagooyinka taageerada ardayda oo dheeri ah.

Mudane Cardet-Hernandez ayaa codsaday caddeyn ku saabsan qorshayaasha xiritaanka dugsiga, xoojinta, iyo isku-darka.

SOO XIRIDA

La ansixiyay **-** Qiyaastii 10:41 p.m., Guddiga ayaa si aqlabiyad leh ku ansixiyey, iyada oo la yeerinayo, inay kulanka soo xiraan.

Xaqiijinta:

Elizabeth Sullivan
Xoghayaha Fulinta